# Maxaa dhacay?

Bishii Janaayo ee sanadkan Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeybta Cas ayaa ogaatay jebinta amniga internetka ka dib markii tuugadu ay u suurtagashay in ay galaan gal la'aan shabakadeeda kumbuyuutarka oo ay galaan server-yada kuwaas oo ka kooban macluumaadka la xiriira soo celinta adeegyada Xiriirinta Qoyska ee Laanqeybta Cas iyo Bisha Cas ee caalamiga ah. ICRC-du waxay kaxaysay seerfarrada taageera adeegyada Xiriirinta Qoyska iyo dhammaan macluumaadka inta ay baarayaan shilka.

Bayaanka warbaahinta Laanqeyrta Cas ee Ingiriiska ee ku saabsan jebinta amniga internetka ee ICRC ayaa laga heli karaa **halkan.**.

**Yaa waxan sameeyay maxayse ku samayn doonaan xogta?**
**Waa maxay xogta ay saamaysay?**
**Yaan la xiriiri karaa haddii aan ka walaacsanahay xogtayda?**
**Talo ku socota dadka laga yaabo inay saamayso**
**Maxay samaynaysaa Laanqayrta Cas ee Ingiriiska?**
**Sideen ku heli karaa macluumaad dheeraad ah?**

# Yaa waxan sameeyay maxayse ku samayn doonaan xogta?

ICRCdu waxay aaminsan tahay in tani ay ahayd xad gudub amni oo casri ah; si kastaba ha ahaatee ma garanayaan cidda ka danbeysa mana jirto ilaa hadda cid sheegatay mas'uuliyadda. Waqtigan xaadirka ah, sidoo kale ma jiraan wax caddaynaya in jebinta amniga internetka ay sababtay in xogta shakhsi ahaaneed la lumo, la xado, si xun loo isticmaalo ama la daabaco.

# Waa maxay xogta shakhsi ahaaneed ee la saameeyey?

Jebinta amniga interneedku waxay ku lug lahayd gelitaanka aan la ogalayn ee ICRC'da serfarada ka kooban yahay macluumaadka la xidhiidha Adeegga Soo Celinta Qoyska ee Laanqayrta Cas iyo Dhaqdhaqaaqa Bisha Cas. ICRC-du waxay la shaqaynaysaa khubaro dibadeed si ay u falanqeeyaan xaaladda oo ay u ogaadaan haddii xog shakhsiyeed ay saamaysay.

Xogta gaarka ah ee laga yaabo in la saameeyey waxaa ka mid ah qaybaha soo socda:

- Macluumaadka ku saabsan shakhsiyaadka raadinaya qoysaskooda iyo faahfaahinta xubnaha qoyska, tusaale ahaan magacyada, jinsiga, taariikhda dhalashada, goobta dhalashada, isir ama asaal ahaan.
- Ciwaanka meesha, ciwaanka iimaylka iyo nambarada telefoonada
- Macluumaadka ku saabsan xiriirka qoyska ee ka dhexeeya shakhsiyaadka raadinaya qoysaskooda iyo xubnaha qoyska ee maqan.

Dhacdadani waxay saamaynaysaa adeega Baafinta Qoyska ee Laanqayrta Cas ee Ingiriiska oo kaliya, kaas oo si ku meel gaadh ah loo hakiyay. Ma saamaynayso adeegyada kale ee Laanqayrta Cas ee Ingiriiska ama xogta.

Laanqeyrta Cas ee Ingiriiska iyo ICRC waxay si wadajir ah uga shaqeynayaan inay baaraan ICRC-da jebinta amniga internetka oo ay qiimeeyaan in wax xog shakhsi ah ay saameyn ku yeelatay.

## Yaan la xiriiri karaa haddii aan ka walaacsanahay xogtayda shakhsi ahaaneed?

Haddii aad ka welwelsan tahay badbaadada xogtaada gaarka ah, ama aad rabto in xogtaada shakhsiyeed la tirtiro, fadlan iimayl u dir **dataprotection@redcross.org.uk.** Haddii aad rabto inaad qof kala hadasho weerarka internetka, fadlan naga soo wac**0300 373 0192** (la heli karo Isniin - Jimco 10 subaxnimo - 5 galabnimo). Turjubaano ayaa diyaar ah.

## Talo ku socota dadka laga yaabo inay saamayso

Ka dib jebinta amniga interneedka ee ICRC, waxaa muhiim ah in laga digtoonaado ka jawaabista fariimaha iimaylada, qoraalada ama telefoonada aad u malaynayso in aanay run ahayn.

Tusaale ahaan, haddii aad hesho iimaylo lama filaan ah ama fariin qoraal ah oo sheeganaysa inaad ka timid Laanqayrta Cas ama aad ku waydiiso macluumaadkaaga shakhsiyeed:

- **Ha ku dhufan** wax xidhiidhin ah oo ku jira fariinta.
- **Isla markiiba tirtir** fariinta oo ha gudbin hana wadaagin.
- **Ha ka jawaabin** fariimahan hana wadaagin macluumaadka shakhsi ahaaneed

Mar kasta oo shaki ku jiro, ka hor intaadan qaadin tillaabo dheeri ah fadlan iimayl u dir **dataprotection@redcross.org.uk,** ama naga soo wac **0300 373 0192** (la heli karo Isniin - Jimco 10 subaxnimo - 5 galabnimo). Turjubaano ayaa diyaar ah.
Haddii aad ka welwelsan tahay ammaankaaga, fadlan la xiriir booliiska.

## Maxay samaynaysaa Laanqayrta Cas ee Ingiriiska?

BRC iyo ICRC waxay si dhow u wada shaqeynayaan iyo sidoo kale khubaro dibadda ah si ay u falanqeeyaan jebinta amniga internetka oo ay go'aamiyaan waxa dhacay, iyo sidoo kale in ay qiimeeyaan in wax xog shakhsi ah ay saameyn ku yeelatay.

Waxa aanu wadnaa in aanu la xidhiidhno dadka ay arrintani saamaysay si taxaddar leh, si aanu ula socodsiino oo aanu u taageerno. Waxaan si dhow ula soconaa xaaladda, waxaanan la socodsiin doonnaa mareegtayada haddii ay wax isbedelaan.

## Sideen ku heli karaa macluumaad dheeraad ah?

### Adeegga Raadinta Qoyska Caalamiga ah

Jebinta amniga internetka awgeed, ICRC iyo Laanqeyrta Cas ee Ingiriiska waxay qaateen go'aanka ah inay hakiyaan adeegeena Baafinta Qoyska ee Caalamiga ah hadda si taxadar leh. Inta lagu jiro wakhtigan, ma awoodno inaan wax cusub ka siino kiisaska furan ama ma

aqbalno tixraacyo cusub. Waxaan eegaynaa siyaabaha aan ku sii wadi karno shaqadan muhiimka ah waxaanan cusbooneysiin doonaa boggan sida ugu dhakhsaha badan ee aan awoodno.

Aad ayaan uga xunahay waxa dhacay, waxaanan fahamsanahay in marka aan maqalno ku saabsan jebinta amniga interneedka ee ICRC-da in laga yaabo in ay welwel ku hayso dadka qaar ee la soo xiriiray adeeggayaga Raadinta Qoyska ee Caalamiga ah.

Waxaan u samaynay khad taleefoon oo bilaash ah qof kasta oo ay taageerayso Laanqayrta Cas ee Ingiriiska Adeegga Raadinta Qoyska ee Caalamiga ah ee qaba su'aalo ama jecel inuu ka hadlo jebinta amniga internetka ee ICRC.

Fadlan kala xidhiidh Adeegga Raadinta Qoyska Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas ee Ingiriiska wixii macluumaad dheeraad ah **0300 373 0192** (la heli karo Isniin - Jimco 10 subaxnimo - 5 galabnimo). Turjubaano ayaa diyaar ah.

meel aan nasasho lahayn - U+00A0 Waxaanu cusboonaysiin doonaa boggan markaan helno macluumaad dheeraad ah oo aan wadaagno.